

La qabsiga qaab nololeed cusub ee ku noolaanshaha Scotland waxay qaadan Kartaa wakhti. Warqadani waxay kaa caawinaysaa fahanka nolasha Scotland.



Waxay ku siinaysaa macluumaad kooban oo ku saabsan caadooyinka, habdhaqanka, shuruucda ama qawaaniinta kuwaasoo ka duwanaan kara kuwii waddankaagii.

## Xaddidaadaha da'da ee sharciga

Dadka inta badan waxa loo tixgaliyaa dad waawayn kadib da'da 18 jirka. Si kastaba, da'da sharciga ah ee hawlo cayiman waxay u kala duwanaan karaan sidan soo socota:

- Cabbista khamriga – waa inuu noqdaa **18 jir** ama ka wayn
- Cabbista sigaarka – waa inuu noqdaa **18 jir** ama ka wayn
- Helista sharciga baabuur wadista – waa inuu noqdaa **17 jir** ama ka wayn
- Ka tagista waxbarashada – waa inuu noqdaa **16 jir** ama ka wayn
- Oggolaansha galmada – waa inuu noqdaa **16 jir** ama ka wayn si uu galmo u sameeyo

## Carruurta

- Waalidka waxa loo tixgaliyaa inuu masuul ka yahay carruurtiisa ilaa da'da 18 jirka
- Carruurta yaryar waa inaan lagaga tagin goobaha dadwaynaha ama guriga iyadoon lala joogin.
- Garaacidda ama dhirbaaxidda carruurta lama oggola

## Sigaar cabbista

- Sigaar cabbista lagama oggola meel kasta ood ku aragto calaamaddan
- Sigaar cabbista lagama oggola guryaha dhexdooda ama meelaha dadwaynaha ee xidhan ooy ka mid yihiin xafiisyada, makhaayadaha, baararka iyo meelaha wax lagu daawado
- Ku cabbista sigaarka meelaha aan laga oggolayn waxay keeni kartaa ganaax
- Sigaarka waxa lagu cabbi karaa debedda, gurigaaga gaarka ah ama gaadhigaaga, ilaa uu cayimay mulkiilahaagu ama haddii baabuurka loo isticmaalo arrimo ganacsi



## **Khamriga**

- Ku cabbidda khamriga goobaha dadwaynaha, sida wadada iyo beeraha lama oggola. Samaynta sidaasi waxay keeni kartaa ganaax.

## **Mindiyaha**

- Qaadashada mindidu waa sharci darro Scotland. Haddii bilaysku ku joojiyo ood sidato mindi, waxay keeni kartaa xadhig.
- Mindiyaha lagama oggola dugsiyada

## **Qashin daadin**

- Qashin ku daadinta ama ashyaada la nacay waddadu waxay keeni kartaa ganaax £50 ah.

## **Midabtakoor**

- Waa sharci darro in lool dhaqmo, ama qof loola dhaqmo si gaara ama la midabtakooro iyadooy ugu wacan tahay da'diisa, naafanimadiisa, dib u habaynta jinsiga, guurka iyo wada noolasha dadka isku sinjiga ah, uurka iyo hooyonimada, galmada ama doorashada galmada.
- Handadaadu waa sharci darro waxayna horseedi kartaa dambi ku soo oogid sharciya.
- Haddaad dareento in lagu handaday, ha noqoto hadal ahaan ama jidh ahaan, waa inaad la xidhiidhaa bilayska. Waxaad heli kartaa caawimo haddaad la hadasho qof jooga Scottish Refugee Council ama kala xidhiidh Anti-Social Behaviour Taska Force 0800 027 3901

## **Xadgudubka dumarka lagu sameeyo**

- Xadgudubka dumarka lagu sameeyo waxa ku jiri kara: xadgudubka guriga, kufsi, dhallinimada, ka shaqaysiga galmadooda iyo suuqa-madaw, ku faroxumaynta carruurnimada, gudidda (FGM), guurka khasabka ah iyo dambiyo sharafeed.
- Islaamaha iyo hablaha Scotland jooga oo dhan waxay xaq u leeyihiin inaan lagu samayn nooc kasta oo xadgudubka dumarka lagu sameeyo ah
- ku xadgudubka guriga waxa ku jiri kara mid jidheed, mid galmeed, mid nafsiyeed iyo mid lacageed
- caawimo iyo taageero qarsoon ayaa loo heli karaa qof kasta oo la kulmaya nooc kasta oo xadgudub ah ama xadgudub guriga ah.

Caawimo iyo talo ayaa laga heli karaa ururada sida:

- Scottish Women's Aid Domestic Abuse Helpline: 0800 027 1234 (24ka saacadood)
- National Rape and Sexual Assault helpline: 08088 01 03 02
- Archway Glasgow: 0141 2118175

## **Kala duwanaanshaha caadooyinka iyo habdhaqanka la aqbali karo**

Inkastoo habdhaqanada qaar ayna sharciga ku jiran, hadana caadooyinka iyo waxyaabaha laga filayo Scottish-ka waxay ka duwanaan kartaa wixii dalkaaga. Kuwan waxa ku jiri kara:

- Filashooyinka ku saabsan inta dadku isku jiri karaan iyo istaabashada jidheed way kala duwan yihiin wadamadu. Marka UK la joogo sida qaalibka ah dadku waxay jecel yihiin in la siiyo faalal marka dadka uu la joogo si uu ugu sii jiro dareen deggenaansho
- U ururidda dad aad u badan, gaar ahaan wiilasha, waxa loo arki karaa cabsi.
- Qaabka guud ee ragga iyo dumarka loo salaamaa UK waa in la dhaho 'nabadeey' iyo/ama la gacan-qaado

## **Baabuur kaxaynta UK**

Haddaad ka codsatay magalgalyo-doon UK oonad wali helin fasax ku joog, ma awoodi doontid inaad codsato liisanka wadista baabuurta UK 25 maarso 2010.

Haddaad leedahay helis sax ah ee gaadhi waa inaad haysataa:

- Liisanka baabuurta oo shaqanaya/oo sax ah
- Caymiska gaadhiga
- Shahaadada MOT oo shaqaynaysa/saxna ah oo caddaynaysa in gaadhigaagu nabdoon yahay
- Aaladda xisaabinta cashuurta oo shaqaynaysa/saxna ah
- Haddaad leedahay liis sax ah ood kala timi waddan debadda ah iyo dokumentiyada caddaynaya tan, waxaad awoodi kartaa inaad ku kaxayso baabuurka liisanka aad debadda kala timid ilaa 12 bilood laga bilaabo maalintii aad soo gashay UK.
- Waa lagu dacwayn karaa haddii aad gaadhi kaxayso marka aad sakhraansan tahay ama daroogaysan tahay

## **Liisan ka TV-ga**

- Haddaad leedahay tilifishan waa inaad iibsataa liisanka TV-ga.
- Waxaad iibsan kartaa liisanka TV-ga haddii aad wacdo **0300 790 6131**, xidhiidhka kombiyuutarka [www.tvlicensing.co.uk](http://www.tvlicensing.co.uk) ama qof ahaan tukaan kasta oo leh calaamaddan:

